

Degmadda Hennepin (Hennepin County) Deeqaha Gargaarida Dib u Furida Ganacsiyada yaryar

Habraacyada Barnaamijka

Maalinta la sii daayey: Luulyo 27, 2020

Furan Luulyo 30 – Agoosto 12

Degmadda Hennepin waxa ay ku dhawaaqday helitaanka \$10,000,000 oo deeq ah oo loo heli karo ganacsatada yaryar ee dhibka dhaqaale la soo darsay iyadoo sababtu tahay cudurka COVID-19 ka ee dillaacay.

Ganacsiyada yaryar ee ku yaal Degmadda Hennepin ee ay haystaan dhibaatooyinka dhaqaale oo ku soo gaaray cudurka COVID-19 awgii kana soo baxa shuruudaha xaq u yeeladka ee hoose waxa ay codsan karaan Gargaarada Dib u furida Ganacsiyada yaryar (SBRR) deeqadaasi waxa ay gaari karaan xoolo guud oo ah \$15,000. Dhaqaalaha deeqda waxaa loo isticmaali karaa in kharashaad hawgalada ah oo khaas ah iyo kharashyada kale ee la galo si si amaan ah dib loogu furo ganacsiga loona dhaqan-geliyo hab-dhaqano ganacsi oo waafaqsan shuruudaha cusub si loo sugo amaanka shaqaalaha iyo iyo macaamiisha xilligan uu dillacay cudurku.

Mudnaan gaar ah waxaa la siin doonaa ganacsiyada ka helay \$5,000 ama ka yar gargaarada dhaqaale ee degdeg ah ee la xiriirka cudurka COVID-19 ka ilo heer deegaan hoose, degmo gobol ama dowlada dhexe ah.

Ganacsiyada xaqqa u leh ee horey uga helay Deeqaha Gargaarada ee Dhaqaale ee Ganacsiyada yaryar Degmada Hennepin waa ay codsan dhaqaale kale oo dheeraad ah oo gaaraya wadar guud oo ah ilaa iyo of \$15,000 oo loo bixinayo kharashyada xaqqa u yeesha in la bixiyo ee hoos ku xusan.

Xaqu yeeladka Ganacsiga

Codsiyada dib ayaa loo eegi si loo hubiyo fulinta shuruudaha xaq u yeeladka iyo cadadka guud ee dhaqaalaha ah ee laga helay ilo heer deegaan hoose, degmo gobol ama dowlada dhexe ah.

Si uu xaq ugu yeesho deeqda, waa khasab ganacsiga

- In deegaanka laga leeyahay, uuna yahay ganacsi ku leh goob rasmi ah oo uu ka hawlgalo Degmada Hennepin, uuna saameyn u geystay cudurka COVID-19 ee dillaacay.
- Ay u shaqeyso ugu yaraan 1 qof oo shaqaale ah iyo ugu badnaan 50 shaqaale ah oo uusan ku jirin mulkiilaha.
- Inuu ka diiwaan gashan yahay, magac fiicana ku leeyahay Xafiiska Xoghayaha Gobolka ee Minnesota (Minnesota Secretary of State), hadii loo baahdo.

- In uu awoodo in uu cadeeyo in dhibaato dhaqaale ay ugu soo gaartay cudurka COVID-19 awgii mid ama labadan jid ee soo socda:
 - Ganacsiga ma ku xadiday inuusan ka kormarin karin hawlgalkiisu 50% amarkii sare ee la soo saaray Maajo 18, 2020 ama
 - Ganacsigu ugu yaraan dakhligiisu hoos ma u dhacay 10% cudurka COVID ee dillaacay iyo xaalada degdeg ah ee jirta awgood
- Inuu wax canshuurta hantida ma guurtaanka ah aan lagu lahayn, hadii ay quseeyso
- Uu ka hawlgalayey lacagna ka sameeynayey Degmada Hennepin ka hor Janaayo 15, 2020

Ganacsiyada aan Xaqqa u lahayn

- Ganacsiyada guriga ka furan; kuwa aan lahayn goob ramsi ah oo ganacsi oo u furan
- Ururada Sama-falka
- Shirkada waaweyn oo goobaha badan leh, gobolo kala duwan ah oo badan ka furan
- Ganacsiyada musalifay ka hor Febraayo 29, 2020
- Ganacsiyada inta badan dakhligooda ka hela maalgelinta dadban kaliya, khamaar, ama wax dakhli ah madaalada fawaaxishka ah

Kharashaadka Xaqqa u leh

Kharashaadka waa khasab in la galay mudadda u dhexeeya Maarso 15-Agoosto 30, 2020. Deeqaha Degmada Hennepin ee Gargaarida Dib u Furida Ganacsiyada yaryar (SBRR) waa dhaqaale laga helay barnaamijka dowlada dhexe ee la yiraa CARES Act. Deeqaha Barnaamijka (SBRR) LOOMA isticmaali karo isla kharash uu ganacsi gargaar in la bixiyo ah uu ka helay ilo kale oo dowladda dhexe leedahay. Wixii kharash ah ee lagu bixiyey dhaqaale laga helay ilaha (SBA) [Paycheck Protection Program (PPP)], Amaahda Waxyeelada Dhaqaale ee SBA [SBA Economic Injury Disaster Loan (EIDL)] ama (EIDL Advance), Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota [State of Minnesota Department of Employment and Economic Development (DEED)] Deeqaha Ganacsiyada Yaryar, ama deeqo kale ama amaahaha la cafiyo aakhirka ama magaalo isticmaashay dhaqaale dowlada dhexe leedahay xaq u ma laha dhaqaalaha (SBRR).

Ganacsiyadu waxa ay codsan karaan deeq gaaraysa \$15,000 (cadadka ugu yar ee deeqdu waa \$2,500) iyadoo ku salaysan ganacsiga kharashaadkiisa xaq u leh deeqda oo ay ku jiraan:

- Kharashaadka hawlgalada ee la galay wixii ka dambeeyey Maarso 15 ee aysan bixin deeqo kale ama amaahaha la cafiyo. Kharashaadka xaqqa u leh waxaa ku jira:
 - Bixinta kirada goobta ganacsiga ama moorgeejkeeda
 - Lacagta caymiska
 - Bixinta korontada
 - Kharashaadka alaabta ku baxa

- Bixinta kharashaadka tooska ula xiriira hawlgalada ganacsiga
- Kharashaadka la galay si loo soo gato sahay, loo helo gargaar farsamo, noocyo ka mid ah qalabyada iyo baahiyo kale si kolkaa dib loogu furo si amaan ah oo waafaqsan habraacyada hay'ada caafimaadka dadweynaha, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota, iyo Rugaha Xakameynta iyo ka Hortagga Cudurada (CDC). Tusaalayaasha kharashaadka xaqqa u leh in la bixiyo waxaa ku jira:
 - Kharashyada la galo ee dhisida iyo alaabta dhismaha si loo hagaajiyo ama dib u habeyn loogu sameeyo goobta sida, qoqobayaal goobta, dhisid awoodsiisa in isticmaali karo dibada. Bixinta lacagta qandaraaslayaasha dhismaha ee shaqaalaha leh waxaa lagu koobay \$2,000.
 - Alaabta iyo wixii kale ee loo soo gato cudurka COVID-19 awgii, sida muraayadaha gaashaanka ah ama kala qaybiyeyaasha kale, calaamadaha, sunta gacmadaha nadiifisa ee darbiyada la geliyo ama kuraasta iyo miisaska dibada la dhigo si loo fuliyo nidaamyada kala fogaanta dadka ee la xiriira cudurka-COVID ka.
 - Dayactirka qalabka (HVAC) ga, hababka sifeynta hawada, ama waxyaabaha la mid ah si loo caawiyo ka hortagga faafida fayraska.
 - Alaabta naafada, amaanka, ama baaritaanka loo adeegsado oo ay ku jiraan soo gadashada Qalabka Ilaalinta Shakhsiga (PPE). Bixinta kharashaadka alaabta caynkaa ah waxaa lagu koobay sahayda loo baahan yahay muddo sedex bilood ah.
 - Hagaajinta tiknoolajiyada khadadka (online) ka, wax gadida, iwm. oo ay ku jiraan u miciinida macmilada iyadoo balan loo sameynayo ama gidaarka alaabta loogu gaynayo cudurka COVID-19 awgii.
 - Adeegyada farsamo/xirfadeed si loogu diyaar garoobo loona dhaqan-geliyo Qorshayaal diyaarsanaan ah loona jiheeyo hab-dhaqanka ganacsiga.
 - Kharashaadka kale ee gargaara dib u furida ganacsiga ee uu horey u sii ogolaado maamulaha barnaamijku.

Wixii su'aalo ah ee kale, fadlan ka eeg Qaybta Su'aalaha Inta badan la is Waydiiyo ee ([Frequently Asked Questions](#)).

Habraaca Codsiga iyo Shuruudaha la Iska Rabo

Codsiyada waxaa lagu aqbali doonaa khadka (online) ka uun. Dhaqaalaha waxaa la qaybin doonaa iyadoo la isticmaalayo hab xulasho oo bakhtiyaa-nasiib ah.

[Gargaar waxa ay ka heli karaan ganacsatadu ururadan soo socda:](#)

African Career, Education & Resource Inc. (ACER)

- Contact: Denise Butler
- Email: dbutler@acerinc.org
- Phone: 763-657-7711

- Website: <https://acerinc.org/>

African Development Center

- Email: info@adcmnnesota.org
- Phone: 612-333-4772
- Toll-free: 1-877-232-4775
- Website: <https://www.adcmnnesota.org/>
- Languages: English, Amharic, Somali, Swahili

Black Women's Wealth Alliance

- Email: service@bwwa-us.com
- Phone: 612-876-1317
- Website: www.bwwa-us.com (can request an appt via website)

Lao Assistance Center of MN

- Provider for SE Asian communities
- Email: sunny@laocenter.org
- Phone: 612-987-2642

Latino Economic Development Center (EDC)

- Email: BIZSUPPORT@LEDCMN.ORG
- Phone: 651-621-2758
- Languages: English, Spanish

Liberian Business Association

- Email: jackson@libausa.org
- Phone: 612-607-4233
- Website: <https://www.libausa.org/>

New American Development Center

- Contact: Asad Aliweyd
- Email: aaliweyd@nadcmn.org
- Phone: 612-232-1372
- Languages: Amharic, English, Oromo, Somali

Northside Economic Opportunity Network

- Email: info@neon-mn.org
- Phone: 612-302-1505
- Website: <https://www.neon-mn.org/>

Codsiyada loo xusho inay u gudbaan dib eegid kale iyo dhaqaalo siin waxaa laga rabi doonaa inay soo gudbiyaan dukumiintiyada xaq u yeeladka ee uu aqbali karo maamulaha barnaamijku. Dukumiintiyada la codsado waxaa ku jiri kara:

- Canshuur celintii ugu dambaysay ama dukumiinti u dhigma
- Miisaanid qoondaysan oo sheegaysa sida loo isticmaalayo deeqda iyo ilaha iyo isticmaalka wixii gargaar dhaqaale ah ee la xiriira cudurka COVID-19 ka ee la helo
- Foomka IRS ka ee 941, W3 ama dukumiintiyada kale oo la xiriira mushaarka shaqaalaha

Cadadka ugu badan ee deeq kasta ah ee loo ansaxiyo ganacsi waa inay ku koobnaataa kharashaadkooda xaqqa u leh ee loo qoondeeyey in lagu bixiyo. Ganacsiyada waxaa laga rabaa inay saxiixaan heshiiska deeq siinta ka hor inta aysan helin wax dhaqaale ah.

Qaatayaasha deeqda waxaa laga rabaa inay u soo gudbiyaan akhbaar daba-gal ah Degmada Hennepin oo ay ku jiraan qorshe miisaaniyeed kama dambays ah iyo dukumiintiyada ku saabsan sida dhaqaalihii loo isticmaalay, oo ay ku jiraan oraaho ama dukumiintiyada la mid ah.

Isticmaalka Macluumaadka

Macluumaad ayaa lagaa codsanayaa adiga si loo ogaado in ganacsigaagu uu xaq u leeyahay inuu ka helo gargaar dhaqaale Degmada Hennepin. Fadlan ogsoonow in wixii macluumaad ah ee ay u hesho Degmada Hennepin soo gudbinta foomkan awgii loo tixgelin doono inay yihiin macluumaad dowladeed sida waafaqsan Sharciga Hab-dhaqanka Xafidida Xogta ee Minnesota, Qodobka Cutubka 13 ee Minnesota [Minnesota Government Data Practices Act, Minnesota Statutes Chapter 13 (the "Act")]. Sida sharcigani dhigayo, qaarka ama dhamaan macluumaadkan oo dhan waxaa loo tixgelinayaa macluumaad dadweyne oo ay ku jiraan magaca ganacsigaaga, ciwaanka, emaylka, telefanka, iyo wixii kale ee akhbaar ah ee aad adigu bixisay, Macluumaadka dadweynaha waa macluumaadka cid walba oo codsataa ay heli karto waxa ayna ka kooban yihiin dhamaan wixii macluumaad ah ee lagu bixiyey foomkan Shabakada (Web). Khasab kuguma aha inaad bixiyo akhbaarta la codsaday, laakiin bixin la'aanteedu waxaa dhici karta inay keento in Degmada Hennepin ay awoodi waydo inay go'aamiso xaq u yeeladka ganacsigaaga ee gargaarada dhaqaale ee ay bixiso. Marka laga reebo ula wadaagida macluumaadka codsiga dowlad hoose ama mid reer gobol ah ujeedada tixgelinta codsiga loo tixgelinayo deeqda ama amaahaha la cafin karo, wixii macluumaad ah ee aad bixiso xilliga codsiga ee loo tixgeliyo inay yihiin xog xafidan ama aan dadweynahu arki karin lama wadaagi doonaan cidna Degmada Hennepin iyo Nextstage iyagoon haysan ogolaanshahaaga aan ka ahayn in sharci gobolka ama dowlada dhexe leedahay uu farayo in cid lala wadaago.